SOMALI

MACLUUMAAD LOOGU TALAGGALAY DHIBBANAHA DAMBIGA EE DHALLINYARADA AH

RIKOSUHRIPÄIVYSTYS
VICTIM SUPPORT FINLAND

CONTENTS

Maxaa faa'iido ah oo adiga kuugu jiri kara hagistaan? 3
Sidee ayaan u samaynayaa wargelinta dambiga? 4
Waa maxay baaritaanka hore? 5
Maxaa loola jeedaa amarka u soo dhowaansho la'aanta? 6
Maxaa ka dhaca kulanka dhexdhexaadinta? 7
Waa maxay qiimeynta dacwad oogista (syyteharkinta)? 7
Sidee ayaa dacwadda fal dambiyeedka loogu falanqeeyaa maxkamadda? 8
Xaggee ka ogaanayaa marka ay dhacayso dacwad qaadista maxkamadda? 8
Yaa jooga goobta dacwad qaadista maxkamadda? 9
Xaggee iyo goorma ayaan helayaa go'aanka dacwad qaadista maxkamadda? 11
Hoolka fadhiga ee maxkamadda 12–13
Waa maxay sababta aan ugu baahanahay qareen, xaggee ayaanse ka helayaa? 14
Noocyadee magdhowyada waxyeellada ah ayaan dalban karaa? 15
Maxaa dhacaaya haddii dambiiluhu uu bixin waayo magdhowga waxyeellada? 15
Kharash intee le'eg ayaa arrinkaan ku baxaaya? 16
Xaggee ayaan caawimaad ka helayaa? 16–17
Falanqaynta dacwadda fal dambiyeedka ee inta ay socdaan howlaha dambiga 18

MACLUUMAAD LOOGU TALAGGALAY DHIBBANAHA DAMBIGA EE DHALLINYARADA AH

Hagista heeganka dhibbanaha dambiga 8, 2022

Sawirrada: Susanna Alanne / Tussitaikurit ▪ Taitto: GS Oy Peippo
Goobta daabacaadda: Suomen Uusiokuori, Somero 2022

Soo aarista hagaha asalka ah waxaa ka qaybqaatay ururka Väestöliitto.

Kooxda shaqada Jaana Koivukangas, Kirsi Porras, Tiina Rantanen.

Waxaa howshaan taageeraaya:
Wasaaradda caddaaladda

MINISTRY OF JUSTICE
FINLAND

MAXAA FAA'IIDO AH OO ADIGA KUUGU JIRI KARA HAGISTAAN?

Hagistaan ama tilmaanbixintaan waxaa loogu talaggalay adiga oo ah, qofka noqday dhibbane dambi. Howsha dambibaarista waxaa ay bilaabanaysaa, marka booliska uu helo macluumaadka ku saabsan dambiga. Hagistaan waxaa lagu soo bandhigayaa arrimaha ugu muhiimsan ee khuseeya ama taabanaaya dadka ah dhibbanaayasha dambiga. Waxaa kuwaas ka mid ah samaynta wargelinta dambiga, su'aalo weydiinta baaritaanka hore ee booliska, qiimeynta dacwad oogista xeerilaaliyaha, suuraggalka ah in dhexdhexaadin la sameeyo iyo dacwad qaadista maxkamadda. Arrimahaan oo dhan waxaa ay qaadanayaan ugu yaraan muddo dhowr bilood ah ama dia caadiga ah wax ka badan sannad, mararka qaarkoodna intaa waqti ka badan ayay qaadan karaan.

Akhrinta ama la socodka howlaha dambi baarista waa arrin cusub oo la yaab ku ah dadka intooda badan. Waana arrin fudud marka aad garanayso waxa kugu soo socda mustaqbalka iyo marka aad taqaanno xuquuqdaada.

Ujeeddada hagistaan waa in adiga lagu siiyo macluumaad, islamarkaana ay hagistaan kaa caawiso fahamka falanqaynta la xiriirta arrinkaaga inta lagu guda jiro howsha dambi baarista. Gabagabada hagistaan waxaad ka heleysaa cinwaannada muhiimka ah ee meelaha aad ka heli karto caawimaadda iyo taageerada.

SIDEE AYAAN U SAMAYNAYAA WARGELINTA DAMBIGA?

Marka aad noqotay dhibbane dambi, waxaad wargelinta dambiga u sheegtaa oo ka samaysaa booliska goobta yimid, dhinaca internetka (**poliisi.fi**), ama mid kasta oo ka mid ah saldhigyada booliska. Sidoo kale qof kale ayaa adiga magacaaga kuugu samayn kara wargelinta dambiga. Sida ugu dhakhsaha badan u samee wargelinta dambiga.

Waad samayn kartaa wargelinta dambiga, xittaa haddii qofka dambiga sameeyay uu ka yar yahay 15 sano. Waxaa ku waajib ah inuu magdhabo khasaarihii uu gaystay, xittaa haddii qofka 15 sano ka yar uusan mas'uuliyadda dambiga falkiisa awgeed wax maxkamad ah ku mutaysanayn.

Haddii aad doonayso waxaad weydiisan kartaa qof caawiye ah oo kula jooga saldhigga booliska, kulanka dhexdhexaadinta iyo dacwo qaadista maxkamadda. Qofka caawiyaha ah wuxuu noqon karaa caawiye ka socda hay'adda heeganka dhibbanaha dambiga (RIKU) ama qof kale oo qaangaar ah oo ehelkaaga ah. Waxaad hay'adda RIKU ka heleysaa taageero iyo caawimaad inta lagu guda jiro marxaladaha kala duwan ee howlaha dambi barista, iyo arrimaha kale ee la xiriira dambiyada: **riku.fi**.

Haddii xaaladda taagan ay tahay mid la xiriirta dagaal ama fal dambiyeed galmoosho ah, waxaad sida ugu dhakhsaha badan ugu tagtaa dhakhtarka. Daryeelista dhaawacyada ka sokow, waxaa muhiim ah in dhakhtarku uu caddeeyo jugta nabarrada iyo dhiigroorka. Marka dacwadda maxkamadda la qaadaayo waxaad u baahan tahay warqadda caddaynta dhakhtarka. Booliska ayaa kagadaal kaa codsan doona adiga oggolaanshahaaga.

Sidoo kale waxaad booliska ka heleysaa kannaallada kala duwan ee warbaahinta bulshada (**poliisi.fi/some**).

WAA MAXAY BAARITAANKA HORE?

Baaritaanka hore waxaa lagu caddeynaayaa, waxa dhacay, waa kuma dadka arrinka taagan ka qaybta ah, waase maxay khaasaraha ka dhashay dambiga.

Booliska ayaa wareysi marba qof si gaar ah ugu yeeri doona dhibannaha iyo eedeysanaha dambiga, iyo markhaatiyaasha suuraggalka ah, sidoo kale waxaa ay soo uruurin doonaan wixii kale oo macluumaad ah oo caddeyn noqon kara. Adiga ka dhibbane dambi ahaan waxaa laguugu yeerayaa magaca ah dacwoode ama muddici (asianomistaja). Waxaa adiga waraysiga laguugu yeeri karaa si toos ah, islamarka aad samayso wargelinta dambiga ama mar dambe ayaa laguu yeeri doonaa iyadoo la qabsanaayo waqti lagu heshiiyay.

Wareysiga dhexdiisa waxaa uu boolisku kaa codsan donaa inaand afkaaga ku sheegto wixii dhacay. Waxaad sheegtaa dhammaan wixii aad xusuusan tahay iyo waliba meelaha faahfaahinta u baahan, xittaa haddii ay adiga kula tahay in aanay muhiim ahayn. Boolisku waxaa haddii loo baahdo uu ku weydiin doonaa su'aalo dheeraad ah. Waa inaad runta sheegto. Isla arrimihii looga hadlay baaritaanka hore ayaa hadhow waxaa looga hadli karaa fadhiga dacwad qaadista maxkamadda. Inaad maxkamadda shakhsi ahaan u timaaddo iyo inkale, waxaa ay ku xiran tahay hadba da'da aad jirto inta ay tahay iyo waxa dambigu uu ku saabsan yahay. Ilmaha ka yar da'da 15-ka sano loogama yeeraayo dacwad qaadista maxkamadda. Xaaladaha qaarkood waraysiga waa la duubi karaa, waxaana fiidiyowga la duubay laga daari karaa fadhiga dacwad qaadista maxkamadda.

Waxaad xaq u leedahay in marka lagu wareysanaayo aad ku hadasho luqaddaada hooyo, ama luqadda kale ee aad fahmayso. Marka booliska uu kuugu yeeraayo waraysiga, waxaad ka codsataa inuu kuu dalbo turjubaan, haddii aad arrinkaas u baahan tahay. Waalidka ama cidda kaa mas'uulka ah waxaa ay xaq u leeyihiin in ay ku soo raacaan marka lagu wareysanaayo. Waxaa intaas dheer oo goobta wareysiga joogi kara qofka caawiyaha shakhsiyadeed ah iyo shaqaalaha sooshaalka.

Booliska waxaa uu ku weydiin doonaa in aad dalanayso in qofka dambiga sameeyay la ciqaabo iyo inkale. Haddii arrinku yahay dambi laga galay qofka muddiciga ama dacwoodaha ah, islamarkaana aad dalbanayso in fal sameeyaha la ciqaabo, waxaa ay boolisku bilaabi karaan baaritaanka hore. Dambiga dacwoodaha ama muddiciga

sida badan waa dambi fudud, kaasoo bilaabista baaritaanka hore ee arrinka ay ku xiran tahay hadba go'aanka qofka dhibbanaha ah uu ka gaaro arrinkaas. Haddii arrinka taagan uu yahay dambi si rasmi ah u hoos yaalla xeerilaaliyaha, boolisku waxaa ay dambiga baari karaan, iyadoo aan ku xirnayn rabitaanka dhibbanaha. Kuwaas waxaa inta badan ka mid ah dambiyada dagaalka ah iyo dambiyada kale ee aadka u waawayn.

Waxaa sidoo kale adiga lagu weydiinayaa, ma doonaysaa inaad magdhow ka hesho khasaaraha ku soo gaaray adiga, tusaale ahaan dhaawacyada jir ahaaneed ama alaabaha xaaladdaan darteed ku jajabay ama la xaday. Intaas waxaa dheer in dambiyada qaarkood uu dhibbanuhu xaq u leeyahay inuu helo magdhowga ku saabsan rafaadka ama dhibaatada soo gaartay qalbi ahaan.

Boolisku wuxuu soo uruurinayaa macluumaadka ku saabsan wargelinta dambiga, waraysida iyo macluumaadka kale ee la soo uruuriyay ee ku qoran qoraalka kooban ee laga sameeyay baaritaanka hore. Waxaa uu u dirayaa xeerilaaliyaha, kaasoo go'aan ka gaaraaya howlaha intaa ka dambeeya ee la qabanaayo.

MAXAA LOOLA JEEDAA AMARKA U SOO DHOWAANSHO LA'AANTA?

Haddii aad si joogto ah ugu baqayso ammaankaaga, qofka ku dhibaaya ama kuu hanjabaaya waxaad ka dalban kartaa amarka u soo dhowaansho la'aanta. Haddii da'daadu ay ka yar tahay 18 sano waxaad oggolaansho uga baahan tahay waalidkaa ama cidda kaa mas'uulka ah, amaba iyaga ayaa ka wakiil ahaan magacaaga kuugu samayn kara. Amarka u soo dhowaansho la'aanta waxaa qofka kale loogu diidayaa inuu kuu soo dhowaado amaba uu qaab kale kuula soo xiriiro. Diidmada waxaa laga codsadaa maxkamadda, waxaana ay shaqaynaysaa ugu badnaan muddo sannad ah. Xaaladaha degdegga ah waxaad la xiriiri kartaa booliska.

MAXAA KA DHACA KULANKA DHEXDHEXAADINTA?

Waxaa adiga lagu weydiin karaa inaad doonayso in arrinka dambiga ah lagu dhammeeyo qaab dhexdhexaadin ah iyo inkale. Xafiiska dhexdhexaadinta waxaad kula kulmaysaa dambi sameeyaha, iyadoo ay idinla joogaan shaqaale dhexdhexaadiyaal ah oo si iskaa wax u qabso ah u shaqaynaaya oo dhexdhexaad ah. Kulankaas waxaa looga wadahadli doonaa arrinka dhacay, waxa sababay ama keenay arrinkaas iyo magdhabidda ama soo gudista khasaarihii dhacay.

Ka qaybqaadashada kulanka dhexdhexaadinta waa mid ikhtiyaari ah, waxaadna baajin kartaa xilli kasta. Haddii aad ka yar tahay da'da 18-ka sano waxaad oggolaansho uga baahan tahay waalidkaa si aad dhexdhexaadinta uga qaybqaadato. Haddii la heshiiyo, waxaa dhici karta in aysan sinnaba u dhicin dacwadda maxkamad qaadista. (**thl.fi/sovittelu**).

WAA MAXAY QIIMEYNTA DACWAD OOGISTA (SYYTEHARKINTA)?

Marka la samaynaayo qiimeynta dacwad oogista, xeerilaaliyaha ayaa akhrinaya qoraalkii laga sameeyay baaritaanka hore ee uu ka helay booliska, waxaana uu go'aan ka gaari doonaa in uu dambiilaha ku soo oogayo dambiga iyo inkale. Haddii uu ku soo oogo dambiga, waxaa arrinka lagu falanqayn doonaa maxkamadda hoose. Waxaa kaloo dhici karta in xeerilaaliyuhu uu amro ganaax, ama uu gaaro go'aanka ah in uusan wax dambi ah soo oogayn. Marka xaalku sidaas yahay arrinka laguma falanqaynaayo maxkamadda. Waxyaabaha lagu saleeyay dambi soo oogis la'aanta waxaa ay noqon karaan tusaale ahaan, in aan la haynin caddaymo ku filan arrinkaas, in heshiis laga gaaray ama sida ay xeerilaaliyaha la tahay in dambigu uu yahay mid yar.

SIDEE AYAA DACWADDA FAL DAMBIYEEDKA LOOGU FALANQEEYAA MAXKAMADDA?

Dacwadda fal dambiyeedka waxaa maxkamadda dhexdeeda loogu falanqayn karaa qaab qoraal ah, ama qaab af ahaan ah oo maxkamadda dhexdeeda ah. Qaab qoraal ahaanta ah waxaa shardi ah oggolaanshaha dhammaan dhinacyada arrinaan qaybta ka ah. Marka arrinku sidaa yahay cidna looguma yeeraayo goobta, kaliya garsooraha ayaa go'aaminaaya xukunka arrinkaas, iyadoo lagu salaynaayo macluumaadka qoraal ahaaneed. Dambiga uu sameeyo ilmaha dad'ddou ka yar tahay 18-ka sano, laguma falanqayn karo qaab qoraal ahaaneed.

XAGGEE KA OGAANAYAA MARKA AY DHACAYSO DACWAD QAADISTA MAXKAMADDA?

Haddii maxkamaddu ay arrinka ka diyaariso dacwad qaadis maxkamadeed oo af ahaan ah, adiga arrinkaas waa laguu soo sheegayaa. Haddii ay waajib kugu tahay in aad goobta timaaddo, waxaa laguugu yeerayaa maxkamadda, iyadoo waraaqda u yeritaanka ay la socoto hanjabaad ah in haddii aad imaan weyso lagu ganaaxaayo. Sababta kaliya ee la oggol yahay in lagaga maqnaan karo dacwad qaadista maxkamadda, waa xanuun uu dhakhtarku caddeeyay, kaasoo xannuunkaas awgiis aadan uga soo qaybqaadan karin dacwad qaadista maxkamadda. Haddii aad doonayso in arrinka magdhow lagaa siiyo, waa inaad xilli hore maxkamadda u soo gudbisaa iyadoo qoraal ah, xittaa haddii aan adiga arrimahaas lagaa codsan.

Xaaladdaan inta lagu guda jiro, waa in aad ugu dambaynta raadsataa caawiye arrimaha maxkamadda ah, si aad caawimaad uga hesho arrimaha kala ah magdhowga waxyeellada iyo dacwad qaadista maxkamadda.

YAA JOOGA GOOBTA DACWAD QAADISTA MAXKAMADDA?

Inta badan dadka buuxiyay 15-ka sano waxaa laga codsanayaa in ay maxkamadda horteeda ka sheegaan sida ay wax u dhaceen. Haddii aadan doonaynin in hoolka maxkamadda dhexdeeda ah aad eedeysanaha is hortimaaddaan, waxaad arrinkaas hore ugu sii sheegtaa caawiyahaaga arrimaha maxkamadda ama caawiyahaaga shakhsiyadeed. Caadi ahaan hoolalka maxkamad qaadista ee maxkamadda waxaa la qaban- qaabin karaa xeyndaab ama teed, kaasoo kaa ilaalinaaya in wajigaaga la arko iyo laba goobood oo kala duwan oo goobaha sugitaanka ah.

Waxyaabaha ka dhacaya maxkamadda si buuxda ayaa loo falanqaynayaa. Gudoomiyaha maxkamadda waa garsoore soo bartay sharciyada, isaga ayaana hoggaaminaaya dacwada maxkamad qaadista, wuxuu qaybinayaa hadallada, isaga kaligiis ayaa go'aanka ka gaaraya xukunka maxkamadda ama waxaa si wadajir ah ula go'aaminaaya dad an garsoorayaal maxkamadeed ahayn oo isaga ku wheliya dacwad qaadista maxkamadda (lautamies). Dadkaas aan garsoorka maxkamadda ahayn shardi ma ahan in ay soo bartaan waxbarashada dhanka sharciyada. Caawiyaha arrimaha maxkamadda ama qareenka waxaa uu xil iska saari doonaa, in aragtiyada dhibbanaha iyo xeerilaaliyaha tixggelin la siiyo. Shaqada xeerilaaliyaha waa inuu muujiyo, in uu dambigu dhacay iyo in eedeysanuhu uu dambigaas sameeyay. Eedeysnaha waa qofka lagu eedeynaayo fal dambiyeedka. Waxaana dacwada qaadista maxkamadda loogu yeeray, si uu uga jawaabo eedeymaha loo soo jeediyay.

Markhaatiyaalka waxaa maxkamadda loogu yeeray in ay sheegaan dhammaan waxa ay ka og yihiin arrinka dhacay. Markhaatiyaalku waxaa ay hoolka dacwad qaadista joogaan oo keliya, xilliga laga dhegeysanaayo markhaatiga. Waxaana gudaha loo soo gelin doonaa si gooni gooni ah oo markiiba hal qof ah. Garsooruhu wuxuu ka codsan doonaa markhaatiga inuu ballan qaado inuu runta shegi doono.

Waalidiinta ama mas'uuliyiinta ilmaha da'doodu ka hooseyso 18-ka sano waxaa ay xaq u leeyihiin in ay goobjoog ka ahaadaan dacwad qaadista maxkamadda. Waxaa kaloo intaas dheer oo dacwad qaadista maxkamadda goobjoog ka ahaan kara tusaale ahaan shaqaalaha sooshaalka, caawiyayaasha shakhsiyadeed iyo turjubaannada.

Inta badan dacwad qaadista maxkamadaha waa kuwo albaabadu u furan yihiin, markaasoo ay goobjoog ka ahaan karaan xittaa dad arrinka ka baxsan. Haddii dacwad qaadista maxkamadda lagu falanqeynaayo arrimo gaar ah oo shakhsi ahaaneed, waxaad soo jeedin kartaa codsiga ah, in aanay dad arrinka ka baxsan goob joog ka ahaan karin.

MAXAAN SAMAYNAYAA MAXKAMADDA DHEXDEEDA?

Dacwad qaadista maxkamadda waxaa ay qaadan kartaa dhowr saacadood. Markii lo baahdana waxaa la qadaan doonaa bareeg ama nasasho. Waxaad hore u soo qaadataa raashin ama lacag aad ku iibsato raashin fudud.

Waxaad ku soo labisan kartaa dharkaaga caadiga ah. Waaxad goobta timaaddaa waqtigii laguu qabtay, oo ha ka soo daahin. Inta badan waxaa maxkamadaha gudahooda lagu sameeyaa baaritaan dhanka ammaanka ah oo lagu samaynaayo dhammaan dadka gudaha soo galaaya.

Waxaa dhici karta in eedeysanaha aad iskaga hortimaaddaan goobta sugitaanka. Haddii aad dareemeyso in iska horimaadkaas uu yahay mid xun oo aan wanaagsanayn, waxaad ku sugi kartaa meel gees ah oo ka yara durugsan qaacada gudaha ee la isugu yeeri doono. Waxaad kaloo hore u sii weydiisan kartaa, suuraggalnimada ah, in aadan doonayn in aad sinnaba isaga hortimaaddaan qofka eedeysanaha ah.

Telefoonka iska xir marka aad soo gasho gudaha qaacada. Waxaad isu diyaarisaa in adiga lagaa codsan doono in aad afkaaga ku sheegto, sida uu dambigu u dhacay, iyo khasaaraha arrinkaas ka dhashay. Waxaad ugu hadashaa makarafoonka miiska ku rakiban si cad oo la maqli karo.

Waa inaad runta ka sheegtaa maxkamadda gudaheeda. Garsooraha iyo dadka la shaqaynaaya ayaa gaaraya xukunka maxkamadda, iyagoo arrinkaas ku salaynaaya waxa ay ka maqleen hoolka maxkamadda. Sababtaas awgeed waa in aad arrinka mar kale sheegtaa, xittaa haddii aad hore ugu sheegtay booliska. Waxaad dhammaan arrimaha u sheegtaa si cad oo dhab ah, sikasta oo ay ugu muuqdaan in ay yihiin kuwo foolxun oo yaxyax leh, ama haddii adiga lagaa codsaday inaad arrinka qariso. Dacwad qaadista maxkamadda waxaa looga bartay in laga maqlo arrimo gaar ahaaneed ama kuwo laga khajilaayo sheegistooda. Ma ahan wax ceeb ah in la ooyo ama ciriiri la dareemo, marka ay khasab noqoto in laga hadlo arrimaha aadka u adag. Haddii boolisku uu baaritaankii hore kaa duubay wareysiga, waxaa suuraggal ah in dacwad qaadista maxkamadda laga daawdo fiidiyowga la duubay, lagaagamana baahna in aad si shkahsi ahaaneed goobta u timaaddo.

Is deji xiittaa haddii eedeysanuhu uu kugu eedeeyo inaad been sheegeyso, ama uu ku yaso, amaba uu eedda adiga kugu soo rogo. Sharciga kuma waajibinaayo isaga in uu runta sheego. Dhammaan dadka go'aanka gaaraaya waa ay ogyihiin, tixgelinna waa ay siinayaan arrinkaas, waxna uma dhimayso qiimaha waxa aad sheegtay.

Waxaa sidoo kale adiga lagu weydiin karaa su'aalo dheeraad ah. Haddii aadan xusuusan ama aadan fahmin dhammaan su'aalaha, sheeg arrinkaas. Waxaad codsan kartaa nasasho ama bareeg, haddii aad dareemeyso wax xun ama tusaale ahaan aad doonayso inaad suuliga ama musqusha aaddo.

XAGGEE IYO GOORMA AYAAN HELAYAA GO'AANKA DACWAD QAADISTA MAXKAMADDA?

Go'aanka ama xukunka maxkamaddu ay gaarto waxaa la sheegi karaa, marka ay dhammaato dacwad qaadista maxkamadda. Sidoo kale waxaa qaab qoraal ahaan ah uga heli kartaa xoghaynta maxkamadda, sida caadiga ah muddo laba toddobaad gudahood ah. Haddii aad leedahay caawiyaha arrimaha maxkamadda, xukunka maxkamadda isaga ayaa loo dirayaa. Xukunka ama go'aanka maxkamadda waxaad ka qaadan kartaa racfaan aad u gudbinayso maxkamadda racfaanka, si arrinkaas loo helana waxaa mararka qaarkood loo baahan yahay oggolaanshaha sii falanqaynta arrinkaas (jatkokäsittelylupa). Go'aanka maxkamadda racfaanka kaddib, waxaa haddii loo bahdo maxkamadda sare aad ka codsan kartaa oggolaanshaha racfaanka (valituslupa).


Xoghayn
Garsoore
2 ka mid ah ka qaybqaatayaasha garsoorka ee aan ka tirsanayn garsoorayaasha maxkamadda (lautamises)
Xeerilaaliye
Markhaati
Qareen
Qareen
Caawiyaha shakhsiyadeed ee hay'adda -RIKU
Dhibbane (qofka arrinka iska leh)
Eedeysane (Vastaaja)

WAA MAXAY SABABTA AAN UGU BAAHANAHAY QAREEN, XAGGEE AYAANSE KA HELAYAA?

Sida caadiga ah caawiyaha arrimaha maxkamadda ama qareenka waa lagammamaarmaan, marka fal dambiyeedka lagu falanqaynaayo dacwad qaadista maxkamadda. Adiga ayuu kula talinayaa, wuxuuna xil iska saarayaa arrinka ah, in uu gudbiyo dalabka magdhowga ee ku saabsan dhibaatada adiga ku soo gaartay. Waa arrin wanaagsan in la raadsado caawiyaha arrimaha maxkamadda, marka baaritaanka hore ee boolisku uu diyaar noqdo, fal dambiyeedkana loo wareejiyo qiimeynta dacwad oogista ee Xeerilaaliyaha. Gaar ahaan qareenka fal dambiyeedyada arrimaha galmoodka ama jinsiga, waxaa fiican inuu qofka la socdo marka boolisku uu wareysanaayo.

Caawiyaha arrimaha maxkamadda waxaad ka heleysaa xafiiska caawimaadda arrimaha sharciga (oikeusaputoimisto), kuwaasoo ku yaalla degmooyinka waaweyn. Sidoo kale waxaad qareenka ama caawiyaha arrimaha sharciga ka raadsan kartaa xafiisyada gaarka ah ee qareennada ama arrimaha sharciyada (**asianajajat.fi**). Marka aad dooranayso caawiyaha arrimaha sharciga ama qareenka, waxaad iska hubisaa in uu yahay qof yaqaanna inuu wax ka qabto arrimaha la xiriira falal dambiyeedyada.

NOOCYADEE MAGDHOWYADA WAXYEELLADA AH AYAAN DALBAN KARAA?

Waxaad dalban kartaa magdhowyada waxyeellada ee khasaarooyinka ka dhashay dambiga la sameeyay, markii adiga lagu soo gaarsiiyay kahsaare jir ahaaneed ama mid xagga galmoodka ama jinsiga ah. Sidoo kale waxaa magdhowga dalban kartaa, tusaale ahaan markii adiga lagu garaaco ama lagu harraatiyo, amaba toorreey ama qalab kale lagugu cabsi geliyay, ama rafaad xagga qalbiga ah laguu gaystay, kaasoo waxyeello ku ah noloshaada, ama sida kale in dambigu uu kugu keenay inaad gasho kharashyo, tusaale ahaan kharashyo xagga daryeelka caafimaadka ah, soo iibsashada alaabta la xaday ama waxyeellada la gaarsiiyay, ama kharashka ku baxay hagaajinta alaabta la waxyeelleeyay. Waxaad mar walba xusuusnaataa inaad kaydiso dhammaanba rasiidyada kharashka aad bixisay.

MAXAA DHACAAYA HADDII DAMBIILUHU UU BIXIN WAAYO MAGDHOWGA WAXYEELLADA?

Inkasta oo dambiilaha ay waajib ku tahay inuu bixiyo magdhowga khasraaha ka dhashay dambiga uu sameeyay, haddana mar walba sidaas ma dhacdo. Haddii uu bixin waayo magdhowga waxyeellada ee ay maxkamaddu amartay, waxaad ka dalban kartaa xafiiska ka qaadista (ulosottovirasto) ama khasnadda dowladda. Caawiyahaaga arrimaha maxkamadda ayaa adiga kaa caawinaaya samaynta codsiga. Sida caadiga ah khasnadda dowladdu ma bixiso magdhowga waxyeellada soo gaartay alaabta, marka laga reebo in khasaarahaas uu yahay mid ka dhashay dambiga jirdilka ah.

KHARASH INTEE LE'EG AYAA ARRINKAAN KU BAXAAYA?

Haddii xeerilaaliyuhu uu dambiga ku soo oogo eedeysanaha, adiga wax kharash ah oo dacwad qaadista maxkamadda ay kugu keeneyso ma jiro. Waxaa jira kharashaad ka dhalan kara mushaarka caawiyahaaga arrmaha sharciga, kuwaasoo dadka dakhliga yar aan laga rabin in ay bixiyaan. Dakhliga waalidkaaga laguguma xisaabinaayo. Faahfaahinta dheeraadka ah ee arrinkaan ku saabsan waxaad kala xiriiri kartaa xafiiska caawimaadda arrimaha sharciga **oikeus.fi**.

Caymiska guriga ee qoyskaaga waxaa dhici karta inuu ku jiro caymiska kharashyada sharciga, kuwaasoo laga bixin karo kharashyadaas aan soo shegnay. Dambiyada qaarkood, sida dambiyada galmoodka ama jinsiga la xiriira, waxyaabaha idin dhexmara qofka ehelkaaga kugu dhow ah ama dambiyada dagaalka ee aadka u culus, dowladda ayaa bixinaysa kharashka ku baxaaya caawiyaha arrimaha sharciga ama qareenka. Xaaladaha noocaas oo kale ah waxaad raadsan kartaa qareen gaar ah.

XAGGEE AYAAN CAAWIMAAD KA HELAYAA?

Haddii aad tahay dhibbane, ma ahan in arrinka aad keligaa ku noqotid. Waa in aad xaaladda dhacday kala hadasho waalidkaaga ama qof kale oo dadka waawayn ah oo aad ku kalsoon tahay. Inta badan xittaa waxaa arrinkaan kaa caawinaaya la hadalka saaxiibbada.

Haddii arrimaha kugu dhacay ay yihiin kuwo culays ku ah maskaxdaada, amaba aad doonayso inaad hesho talooyin wax ku ool ah, waxaad weydiin kartaa hay'adaha wax caawiya, sida tusaale ahaan booliska, kalkaalisda caafimaadka ee iskuulka, kuraatoriga ama shaqaalaha guriga dhallinyarada ee aad is taqaannaan. Sidoo kale dhinaca internetka ayaad ka heleysaa macluumaadka iyo suuraggalnimada ah wadahadal aad la yeelato caawiyayaasha xirfadda leh. Internetka waxaad howlahaaga ka dhammaysanaysaa, iyadoo aan lagu garanayn qofka aad tahay.

Waxaad sidoo kale caawimaad raadsan kartaa, haddii qoyskaaga dhexdiisa uu ka jiro ama laga isticmaalo xoogmuquunin (väkivaltaa), xittaa haddii adigu aadan ahayn qofka xoogmuquunintaas ay ku dhacayso. Sidoo kale u sheeg saaxiibkaa caawimaadda aad heshay, haddii uu isaguna noqday dhibbane dambi.

Adeegyada heerka qaran ee la xiriira fal dambiyeedyada:

- Booliska: **poliisi.fi**
- Heegaka dhibbanaha dambiga: **riku.fi/nuoret**
  - ku sheekeysiga dhanka internetka ee RIKU: **riku.fi/chat**
- Bogagga dhallinyarada ee ururka Väestöliito: **vaestoliitto.fi/nuoret**
- Ururka guryaha ammaanka iyo waalidnimo barashada: **ensijaturvakotienliitto.fi**
- Xarunta xaaladda degdegga ah ee kufsiga ee Tukinainen: **tukinainen.fi**
- Badbaadi carruurta: **pelastakaalapset.fi/nettiturvallisuustyo**
- Khadka haweenka: **naistenlinja.fi**
- Xafiiska caawimaadda arimaha sharciga: **oikeus.fi**
- Qareennada gaarka ah: **asianajajat.fi**
- Netari-ga: **netari.fi**
- Dhexdhexaadinta dambiyada iyo khilaafaadka: **thl.fi/sovittelu**
- Booliska warbaahinta baraha bulshada: **poliisi.fi/some**

Canaawiinta kale ee internetka:

- Ururuka badaabada carruurta ee Mannerheim: **mll.fi**
- Caawimaadda warbixinta: **apua.info/neuvonta**
- Ururka caafimaadka maskaxda Finland ee (MIELI Suomen Mielenterveys ry: **mieli.fi**)
  - Ku sheekeysiga dhanka farriimaha internetka (Sekasin-chat: **sekasin247.fi**)
- Guryaha ammaanka ee dhallinyarada ee laanqayrta cas: **www.punainenristi.fi/nuortenturvatalot/**
- Guriga gabdhaha: **tyttojentalo.fi**
- Guriga wiilasha: **poikientalo.fi**

FALANQAYNTA DACWADDA FAL DAMBIYEEDKA EE INTA AY SOCDAAN HOWLAHA DAMBIGA



Qaababka kala duwan ee xalgaarista maxkamadda:
Gannaax, xabsi shuruud ku xiran tahay, xabsi toos ah (aan bannaan joog ahayn), adeegga bulshada, ciqaabta dhallinyarada, ciqaabta laga warqabaayo qofka, xukunka oo la joojiyo, eed qaad aan ahayn ama eedeyntii waa la baajiyay
Faahfaahinta dheeraadka ah ee ku saabsan ciqaabaha, waxaad ka heleysaa: **rikosseuraamus.fi**

Xusuusqor

RIKU
RIKOSUHRIPÄIVYSTYS
VICTIM SUPPORT FINLAND

riku.fi